# Xubinnimada iyo Tigidhada Matxafka oo Loogu Talagalay Qoysaska u Qalma

Minnesota Children's Museum





Barnaamijka *All Play* wuxuu bixiyaa qiimo dhimis xagga tikidhada iyo xubinimada ah si loo xaqiijiyo in dhamaan qoysaska, iyadoo aan loo eegin dakhliga soo gala, ay ku ciyaari karaan madxafka.

## UQALMANAANTA

Qoys kasta oo gunnooyin ka qaata EBT, WIC ama  Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka waxay xaq u leeyihiin tikidhada ama xubinnimada qiimaha laga dhimay iyadoo loo marayo barnaamijka *All Play*.

## DHAMMAAN TIGIDHADA CIYAARTA

- Qoysaska u qalma waxay iibsan karaan tikidhada gelitaanka $3 da'aha 1 ilaa 101
- Carruurta da'doodu ka yar tahay 1 ayaa lacag la'aan ah
- Diyaar u noqo inaad caddeynta u-qalmitaanka ku muujiso xafiiska sanduuqa.

## XUBINIMADA *ALL PLAY*

Iibso xubinnimada qoyska $39

### XUBINNIMADA WAXAA KU JIRA

- Oggolaansho bilaasha hal sanno ee laba qof oo waaweyn iyo dhammaan carruurta ka yar 18 sano ee ku nool hal guri
- Hal qof oo marti ah oo dheeraad ah oo bilaash ah booqasho kasta
- 10% qiimo dhimis ah ee makhaayadda iyo dukaanka madxafka
- Qiimo -dhimisyada tafaariiqleyaasha iyo meelaha soo jiidashada leh

### SIDEE BAAN XUBIN UGA NOQDAA OO U SOO BOOQDAA MADXAFKA?

- Booqo xafiiska sanduuqa matxafka si aad iskaga diiwaangeliso xubinnimada.
- Ama ka iibso xubinnimo onlayn mcm.org/join/all-play-membership/
- Diyaar u noqo inaad caddeynta u-qalmitaanka ku muujiso xafiiska sanduuqa.

## LA XIRIIR MADXAFKA

- Haddii aad su'aalo qabtid, soo wac Madxafka Tel: 651-225-6000
- Booqo mcm.org si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah

*Waa inoo Madxafka!*

10 W, Seventh St., St. Paul, MN 55102 | 651-225-6000 | mcm.org

Minnesota Children's Museum

# WARARKA MATXAFKA

## CINWAAN
Madxafku wuxuu ku yaalaa 10 W. 7th St. Bartamaha Magaalada St. Paul.

## SAACADAHA SANADKA DUGSIGA
*(Maalinta Shaqada – Maalinta Xusuusta)*

Isniin: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . XIRAN
Talaado-Khamiis: . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-4 p.m.
Jimce: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-8 p.m.
Sabti:. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-6 p.m.
Axad: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-5 p.m.

## SAACADAHA XAGAAGA
Isniin-Khamiis:. . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-4 p.m.
Jimce: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-8 p.m.
Sabti:. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-6 p.m.
Axad: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .9 a.m.-5 p.m.

## TIGIDHADA
Tigidhada qiimahoodu waa $16-$19. Waa u lacag la'aan carruurta da'doodu ka yar tahay 1. Lacag la'aan u ah xubnaha. Booqo mcm.org si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

## GAADHI DHIG(PARKING)
Baabuurka waxaad dhigan kartaa garaashka ku yaala Wadada Wabasha ee ku dhegan Daarta World Trade Center oo aad ka soo geli kartid Wadada West 7 Street. Horey usoo qaado tigidhka oo keen Xafiiska Madxafka si aad u hesho lacag dhimis( 3 saac waa $7.50, nus saac kastana waxaa ku kordhaya $1)




## GAADIIDKA DADWEYNAHA
Madxafku wuxuu u dhow yahay wadada 10-aad oo ah halka tareenku istaago ee laga raaco. Basas badan ayaa aagaas yimaada. Si aad u ogaatid baska aad doonaysid inaad raacdo, akhri warbixinta ku qoran jadwalka Metro Transit.

## XUBINNIMO
### Xubinimada Reerka - $155
- Oggolaansho bilaasha hal sanno ee laba qof oo waaweyn iyo dhammaan carruurta ka yar 18 sano ee ku nool hal guri
- 10% qiimo dhimis ah ee makhaayadda iyo dukaanka madxafka
- Dhimis ah ilaa lix tikidh martida booqashadiiba
- Qiimo -dhimisyada tafaariiqleyaasha iyo meelaha soo jiidashada leh
- 50% qiima dhimis ah madxafyada carruurta badan ee ku yaal Mareykanka

### Dheefaha Dheeriga ah ee Xubinnimada Reerka - $255
Dhammaan dheefaha xubinimada Reerka, ku dar...
- 6 kaar oo baarkin bilaash ah, 4 tikidh oo oggolaanshaha gelitaanka oo lacag la'aan ah, 4 foojaro oo kuwa jalaatada ah
- Madxaf gaar ah shay calaamadeysan
- Oggolaanshaha gelitaanka oo bilaash ah ama qiimo jaban oo lagu galo matxafyo badan oo ku yaala Mareykanka oo dhan

### Ku dar marti - $30 midkii
- Gelitaan bilaash ah saaxiib, daryeel-bixiye, ayeeyo ama qaraabo kale booqasho kasta
- Wuxuu noqon karaa marti kala duwan booqasho kasta

## WARBIXINTA MATXAFKA
- Madxafku wuxuu ka kooban yahay 3 dabaq oo bandhig ah. Carruurta jirta 1 sano ilaa 10 jir aad bay uga helaan Madxafka.
- Madxafku wuxuu carruurta 3 sano jirta iyo kuwa ka yarba ugu tala galay bandhig khaas ah oo iyaga khuseeya.
- Dukaan cuntada iyo cabitaanka lagu gado ayaa Matxafka ku yaala.
- Dabaq walba wuxuu leeyahay musqulo iyo qolal nuunaha lagu nuujiyo.
- Waad lasoo geli kartaa Matxafka nuune xambaarka(stroller).
- Dhammaan carruurta soo booqanaysa matxafka waa inay la socdaan oo ay kormeeraan dad waaweyn oo 18 sano jir ah ama ka weyn mar kasta.
- Sanduuqyada kaydinta alaabada ayaa laga heli karaa meel u dhow sanduuqa xafiiska. Sanduuqyadu waxay u baahan yihiin afar meelood meel isticmaalka mar keliya.

## AWOODDA CIYAARTA
Bandhigyadeena waxay kobciyaan waxbarashada caruurta iyadoo loo marayo ciyaaro. Cayaartu waxay dhistaa maskaxda iyo jirka. Marka carruurtu ciyaaraan, waxay kobciyaan xirfadaha ay ugu baahan yihiin inay ugu guul gaaraan guriga, dugsiga iyo meel kasta oo kale.